

UJEEDDO: HESHIIS KIRO GURI

Waxaa maanta oo ay taariikhdu tahay _____, heshiiskan ku saabsan KIRADA GURIGA ku wada galay **Siraadle Public Notary** horteeda labada dhinac ee kala ah:

DHINACA KOOWAAD

KIRAYSTE:

_____ oo uu Wakiil ka yahay _____
heshiiskan dhexdiisana loogu yeedhi doono magaca ah
“KIRAYSTE”

Contact: _____

Email: _____

Iyo,

DHINACA LABAAD:

KIREEYE

_____ oo uu Wakiil ka yahay _____,
heshiiskan dhexdiisana waxaa loogu yeedhi doonaa magaca ah
“KIREEYE”

Telephone: _____

Labadayada dhinac, anagoo xiskayagu dhanyahay, aanayna jirin cid nagu khasabtay, waxaanu si niyad sami ah ku wada galnay heshiiskan.

1. Anigoo ah kireeyaha kor ku xusan waxaan _____ ka kireeyey Guri ku yaala Xaafadda _____ ee Degmada _____, kana kooban _____.
2. Anigoo ah Kiraystaha kor ku xusanna waxaan aqbalay inaan kiraysto Guriga kor ku xusan.
3. Qiimaha kirada Guriga ee bishii waa US\$1 _____ (_____ oo Dollar)
4. Kiraystuhu wuxuu lacagta kirada Guriga bixinayaa _____ (BISHIIBA/SADDEXDII BILOODBA) hal mar.
5. Kiraystuhu wuxuu lacagta kirada ku shubayaa Xisaabta (Account) _____
6. Muddada kiradu waa 5 (shan) sanadood.
7. Kireeyuhu kama masuul aha lacagta kirada haddii lagu bixiyo qaab aan ahayn Xisaabta kor ku xusan.
8. Kiraystuhu waa inuu iska bixiyo kharashka biyaha iyo laydhka muddada uu ku jiro Guriga
9. Waa inaan kiraystuhu waxba ka beddelin qaabka dhismaha ee guriga muddada uu ku jiro, haddii aanu oggolaansho qoraal ah ka helin Kireeyaha.
10. Kiraystuhu isagaa ka masuul ah wixii dhib ah ee uu u geysto Guriga muddada uu ku jiro, waxaana waajib ku ah inuu hagaajiyo/magdhaw ka bixiyo ka hor intaanu wareejin ama heshiiskan ka bixin.
11. Wixii Guriga ku soo gaadha ama kiraystaha ku soo gaadha MASIIBO DABIICI AH, waxba loo raacan maayo labada dhinac.

12. Kirada Guriga Kireeyuhu wuu kordhin karaa, haddii ay labada dhinac isla gartaan, heshiis qoraal ahna ku muujiyaan.
13. Waxaa waajib ku ah kiraystaha:
 - i. Inaanu cid kale ka sii kirayn gurigan, muftaaxiisana cid kale ku wareejin.
 - ii. Inuu ilaaliyo bedqabka dhammaan guriga, hagaajiyona wixii sababtiisa ku soo gaadha.
 - iii. Inuu ilaaliyo nadaafadda Guud ee Guriga gudhihiisa iyo hareerhiisa.
 - iv. Inaan guriga lagu kaydsan, laguna adeegsan, waxyaalaha mamnuuca ah Shareeco Islaam ahaan, sharci ahaan iyo dhaqan ahaanba.
14. Waxaa waajib ku ah Kireeyaha:
 - i. Inuu kiraystaha ku wareejiyo dhisme dhammaystiran oo ay shaqaynayaan dhammaan qaybhiisu, sida: Laydhka iyo biyaha.
 - ii. Inuu bixiyo dhammaan cashuuraha ku waajiba guriga.
15. Xallinta khilaafaadka:

Dhamaanba khilaafaadka ka dhasha heshiiskani waxaa lagu xallin doonaa marka koowaad wada hadal toos ah (negotiation), oo labada dhinac yeeshaan. Haddii wada-hadalkaasi guul lagu gaadhi waayo, waxa xallinta khilaafka loo gudbin doona guddi dhexdhexaadineed (Arbitration) oo labada garab ku kalsoonyihiin, khibradna u leh furdaaminta khilaafyada noocaan ah. Haddiise go'aanka guddidaasi abuuri waayo is faham iyo heshiis, waxa si kama danbays ah loogu kala baxayaa Maxkamadaha Islaamiga ah ee dalka ama Maxkamadaha dawladda.

SAXEEXYADA LABADA DHINAC

KIREEYAHA

Magaca: _____

Saxeexa

KIRAYSTAHA

Magaca: _____

Saxeexa

Markhaatiga Koowaad

Magaca: _____

Saxeexa

Markhaatiga Labaad

Magaca: _____

Saxeexa

CADDAYNTA NOOTAAYADA:

Waxaan halkan ku caddaynaynaa kadib markii loo akhriyey Kiraystaha, Kireeyaha iyo MARKHAATIYADABA inay caddayntan **ku saxeexeen** hortayda aniga oo ah Sarkaalka Nootaayada Siraadle Public Notary.

Siciid Maxamed Cilmi

Sarkaalka Nootaayada.